



WAXA LAGA FILAAYO TABARUCAHA DUGSIYADA DADWEYNHA MINNEAPOLIS

Marka aad tabaruceysid dugsiyada dadweynaha Minneapolis(MPS) waxaa waajib ah inaad ogaatid tabarucaha degmada waxa laga doonayo:

Tabarucahu waa in uu u adeegaa sida mid lagu dayan karo. Marka aad u adeegaysid dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS, waa inaad ka fogaataa dabecadaha aan habooneyn oo ay ka midka yihiin kuwaan soo socda:

- Hadalada aflagaada
- Isticmaalka Maandooriyaha ,khamriga,daroogada
- Hub soo qaadashada
- Dooda Mawduucyada aan habooneyn
- Sameynta Galmada ama shukaansiga ardayda
- Iibinta ama baayacmushtarka iyo ka ganacsiga
- Faafinta (ku dhiirigalinta diinta aaminsan tahay)
- Siinta hadiyadaha ama lacagta

Jagooyinka tabarucada qaar ayaa u baahan danbi barista, waana in lasoo baaraa inta uu san bilaabin jagada tabarucaha.

Labiska tabarucaha waa inay waafaqaan waxa laga filaayo dugsiga, Fadlan iska hubi heshiiska dugsiyada wax badana ka Ogoow.

Tabarucuha waxaa laga filaayaa in uu fuliyo dhamaan sharciyada dugsiyada ee ku saabsan isticmaalka qalabka Elektrooniga (PEDs). Fadlan raac tilmaamaha shaqaalaha dugsiga ama dami/aamusi qalabkaaga korontada inta aad Howsha ku jirtid.

Dhamaan tabarucayaasha waa inay saxiixaan markey bilaabayaana shaqada iyo markey baxayaan, waana inay raacaan xeerka dugsiga sida lagu yaqaano tabarucayaasha..

Waxaa lagaa rabaa inaad kula hadasho hadal edboon marka aad ardayga doonaysid in uu kuu soo jeesto, tabarucuha ma Edbin karo ardayda.. waxaa loo ogol yahay in uu yiraahdo ama isticmaalo hadalo qura. Dhamaan wixii aqlaaq daro ah waa in uu u sheegaa shaqaalaha dugsiga ku shaqada leh arintaas.

Tabarucuha waa in uu ixtiraamaa asturnaanta waalidka iyo ardaygiisa oo aadan ka hadlin ardayga horumarka waxbarasho iyo didu u dhacaba, aqlaaqiisa, ama dhacdooyinka ka dhaca dugsiga.Dhamaan macluumaadka ardayga waa mid qarsoodi ah. Markii aad rabtid in aad la wadaagto macluumaadka ardayga ,marka hore ogolaansho weydiiso maamulka dugsiga ama Macalinka.

Xadgudubka:

Si uu kuu aamino ardayga waa inaan kasbataa ardayga aaminaadiisa, waxaadna wax ka ogaan doontaa noloshooda hadii lagu Xadgudbay noloshooda.xadgudubkaas oo noqonka galmada aan raaliga laga ahayn, garaaca jirka, ama liidista. Sida sharciga Ah, waxaa waajib ah inaad soo sheegto hadii aad ku tuhunto xadgudubka ama aad ogeysiiso hay'adaha ku shaqada Leh.Waala soo xiriiri kartaa maamulaha, Macalinka ama adeegaha bulshada ee Dugsiga si ay kaaga caawiyaan warbixinada .Xaq baad u leedahay inaad hubiso in dacwadii la gudbiyey Hadii aan la gudbina ay iyaga mas'uuliyadeeda qaadayaan.Ardayga kuma qarsan kartid wax sir ah, laakiin waa waajib in aad isyaga aad kalsooni siisid inaad la wadaageyn saaxiibkiis ama ardayda kale.

Lasoo Xiriirka Ardayga:

Tabarucu lama noqon karo kali ardayga. Mar walba waa in uu kula hadlayo ardayga meel dadka u muuqata ama ay shaqaalaha Dugsiga ka dhowyihi. Dhamaan ardayda mid-midka loola fariisto ama 1:1 lala sameeynayo waa in meel shaqaalaha dugsiga kaa arkayaan aad la joogtaa. Ha weydiisan ardayda ciwaanka gurigooda ama taleefonkooda gacanta, ama emailkooda ama macluumaadka adeegaha Bulshada; Hana siin kuwaaga. Hala kula kaftamin ardayda (s) Dugsiga dibadiisa.Hasiin ardaydaada hadiyada.Is faham la'aanta way xuntahay, adiga ma rabtid in qalad lagu fahmo.

Warbaahita Bulshada:

Tabarucaha marnaba ma kala sheekaysankaro ardayga warbixinada uu ku dhajiyo bogga warbaahinta bulshada, shaqaalaha ama Waxkasta oo oo quseeya warbaahinta bulshada. Hakula macaamilin ardayda warbaahita bulshad. Hala wadaagi sawiradada Ardayda ama qoysaska kugu xeeran kuwooda ama kuwa kugu jira warbaahinta bulshada.

Isticmaalka Tubaakada:

isticmaalka tubaakada oo ay ku jiraan (e-cigarettes) Shaqaalaha, Ardayda,Martida, iyo tabarucayaasha, ama kuwa heshiiska la leh dugsiyada degmada. Dugsiyada degmada dhismahooda waa ka mamnuuc, lama soo koobin; Dhismayaasha, Dacalada dhismaha, baarkinada gawaarida,, gaarigaaga, haba u kireysnaadaan degmada ama dugsiyadeeda.

Taabashada:

Waxaan si xoog leh idiinku boorineynaa in aadan taaban ardayda ama aadan la xiriiri karin qoysaskooda.Waxaad la Shaqeyn doontaa ilmo yar oo aan garaneyn xadkooda, maskaxda ku haay ardayga aad la shaqeynaysid hadii aad taabatid Wuxuu u qaadanaya inaad wax kale ula jeedid.

Cayrinta Tabarucaha:

Maamulaha dugsiga ayaa ku cayrin kara hadii uu kaa dareemo inaad ku xadgudbaysid shaqadaada oo aadan gudanayn Waajibaadkaaga.Hadii lagaa soo cayriyo hal dugsi xafiiska tabarucayaasha MPS waxaa ay xaq u lee yihiin inay ay san Dugsi kale kuu dirin.